



Warbixin Ku Saabsan
Waxqabadka Wasaaradaha
Dowlad Goboleedka Koonfur
Galbeed

PRESENTATION FOR
ACCOUNTABILITY FORUM

Baydhabo, Soomaaliya
December 29th, 2016

Hordhac:

Qoraalkani waa warbixin kooban oo laga diyaariyay waxqabadka shan (5) Wasaaradood oo ka mid ah Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya (KGS). Warbixintan waxaalaga soo aruuriyay wasiirada, iyo shaqaalaha kale ee wasaaraddaha.

Ujeedada laga leeyahay warbixintani waa in shacabka KGS loo soo bandhigohowlaha ay qabteen wasaaraddaha mudadii ay jireen iyo waxyaalaha ugu muhiimsan oo u qorsheysan sannadaha soo socda.

Haddaba waxaan idin soo gudbineynaa warbixin kooban oo ku saabsan waxqabadka wasaaraddaha hoos ku qoran:

1. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta
2. Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha
3. Wasaaradda Cadaalada iyo Arrimaha Garsoorka
4. Wasaaradda Caafimaadka
5. Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Qeyraadka Badda

I. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta:

Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya waxa la dhisay 3dii Maarso 2015.

Tan iyo markii la dhisay wasaaradda, waxaa u qabsomey howlo fara badan oo aay ugu muhiimsan yihiin kuwa soo socda:

- Waxaa la sameeyey Xafiis;
- Waxay qabatey Xuska Maalinta Dhirta Aduunka, ayadoo lagubeerey Magaalada Baydhabo 350 geed;
- Waxay Magacowdey Iskuduleyaal isugu jira heer Gobol iyo heer Degmo;
- Waxay isku aruurisey Xirfadliyaasha Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta oo isugu jira kuwii hore iyo kuwa cusub;
- Waxay dib u habeeyn ku sameysey Sharciga Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta;
- Waxay qeyb kaqadatey Tallaalka Cudurada Sambabka Riyaha (CCPP) iyo talaalka Cudurka Sunsunka/Muhogooye (PPR);
- Waxay Baydhabo ka sameeysey Olole Wacyi-galin oo ku saabsan faydhoorka hilibka iyo caanaha, iyadoo booqatey Kawaanada iyo Saylada Baydhabo;
- Waxay shirar la qaadatey Hay'addaha FAO iyo ICRC waxayna u gudbisey Baahida Wasaaradda;
- Waxay tabobar ugu dirtay shaqaalaha wasaaradda iskuul lagu magacaabo Sheekh Technical Veterinary School (STVS) ooku yaala Magaalada Sheekh ee Gobolka Togdheer;
- Waxay kormeero shaqo ku tagtey degmada Afgooyee Gobolka Shabeellaha Hoose halkaas oo laga dhisaayo Kaawaan dhameystiran;
- Waxay ka qeybgashay shirar badan oo ku sabsanaa iskuxirka Dowlad Goboleedyada iyo Dowladda Federaalka ee kashaqeyya Arrimaha Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta.

Wasaaraddu waxay leedahay qorshe heer Dowlad Goboleed ee dhinaca Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta oo faahfaahsan, isla markaana howlaha ay qabaneysey sannadkan waxay ay ahaayeen howl sanadeedka Wasaaradda horey u qorshaysatay.

Wasaaraddu waxay leedahay 15 shaqaale mutadawaciiin ah ooka shaqeyya daryeelka iyo caafimaadka Xoolaha iyo Dhirta.

Mudada Saddexda sano ee soo socota waxyaabaha u qorsheysan inay qabato wasaaraddawaxa ugu muhiimsan:

- In lahorgeeyo Shuruucda Xanaanada Xoolaha iyo DhirtaBaarlamaanka iyo Golaha Wasiirada Dowladda KGS;
- In lasameeyo xaruumo lagu baarayo laguna daweynayoxoolaha;
- In labaro xoolo-dhaqatada xirfaddo ay kor uqaadaan tayada xoolaha;
- Saro u qaadis aqoonta dhammaan shaqaalaha Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta.

II. WasaaraddaShaqada iyo Shaqaalaha

Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya (KGS) waxaa la dhisay bishii Janaayo 3deedii 2015.

Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalahamudadii ay jirtey waxaa u qabsoomay howlaha hoos ku xusan:

- Qorista Shaqaale sida dadban ula shaqeeynaya Wasaaraddaha Dowladda;
- Qorista Guddiga Shaqaalaha Rayidka (CSC);
- Diyaarinta Tababaro loogu talagalay shaqaalaha KGS;
- Diyaarinta iyo dib u habeynta Sharciga Shaqaallaha Rayidka ee (Law No.11);
- Wacyi-galin dhanka shuruucda Shaqaalaha;
- Shaqo abuuris 400 gabdhood oo loo qaadayo dalka Boqortooyada Sacuudi Caraabiya;
- Shaqo abuuris la qorsheynayo oo dhanka NGOs –ka ah iyo Hay’addaha Qaramada Midoobey oo aan weli dhamaanin;
- Iney ku matasho Dowladda KGS shirarka looga hadlayo Arrimaha Shaqada iyo Shaqaalaha.

Wasaaraddu waxay leedahay qorshe Arrimaha Shaqada iyo Shaqaalaha ee heer Dowlad Goboleed. Howlaha sannadkan ay qabaneysey waxay ahaayeen kuwo ku saleysnaa qorshaha sannadlaha ee wasaaradda. Wasaaraddu waxay leedahay 15 shaqaale oo mutadawiciin ah.

Muddada saddaxda sano ee soo socota waxaa ugu muhiimsan iney qabato arrimaha soo socda:

- Diyaarinta casharo kor loogu qaadayo xirfadaha shaqaalaha;
- Abuuris fursado shaqo ku aadan dhalinyarada;
- Tababar dhalinyarada sida loo baro siyaabaha casriga iyo qaababka kala duwan ee lagu raadsado shaqooyinka;
- Diyaarinta shuruucda shaqaalaha sida wakhtiyada ay shaqeyn karaan, shuruucdaas oo waafaqsan midda qaranka (National Labour Law).

Wasaaradda waxey qeyb muhiim ah ka aheyd shirarka Wasaaraddaha Shaqada iyo Shaqaalaha ee heer Dowlad Goboleed iyo heer Dowlad Federal.

III. Wasaaradda Cadaalada iyo Arrimaha Garsoorka

Wasaaradda Cadaalada iyo Arrimaha Garsoorka ee Koonfur Galbeed Soomaaliya waxay ku howlineyd tan iyo markii la aasaasay dardar galintahowlaha Arrimaha Garsoorka iyo Cadaalada si dadka ku hoos nool deegaanada Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya u helaan nidaam garsoor.

Wax yaabaha ugu muhiimsan ee u qabsoomey Wasaaraddu waxa ka mid ah:

- Dhismaha Guddiga Adeega Garsoorka Koonfur Galbeed Soomaaliya;
- Diyaarinta Sharciga Adeega Garsoorka oo uu ansixiyey Baarlamaanka Koonfur Galbeed Soomaaliya;
- Qorista 15 Shaqaale ka Shaqeenaya Maxkamadaha iyo Xeer ilaalinta oo Gacan Siineysa Hay'adda UNDP;
- Qalabeynta Maxkamadaha iyo Xeer ilaalinta;
- Tababaro kala gedisan oo loo qabtey Xeer Ilaaliyaasha iyo Garsooriyaal oo ay qabteen Hay'adda UNDP iyo Xafiiska Siyaasada QM ee Soomaaliya UNSOM;
- Iney ku matasho Dowladda KGS shirarka looga hadlayo Arrimaha Cadaalada iyo Garsoorka dalka Soomaaliya;
- Wacyi-galin dhanka sharciga ah oo ay u sameysey barakacayaal;
- Tababaro Muhiim ah oo la xariira Sharciga oo la siiyey Kaal-Kaaliyaasha Maxkamadaha;
- Waxay dib u dejin iyo habeyn ku sameysey sharciga ilaalinta xuquuqda Caruurta.

Wasaaraddu waxay leedahay qorshe qoran, sidoo kale waxyaanaha ay qabatey mudadii ay jirtay dhammaan waxay ahaayeen kuwo ku saleysnaa qorshaha wasaaradda.

Wasaaraddu wey leedahay Xafiis ay howlaheeda ku fuliso. Wasaaraddu waxay kale leedahay 20 shaqaale oo 15 ka mid ah Mushahaarkoodu ay bixiso Hay'adda UNDP.

Saddexda sano waxyaabaha ugu muhiimsan oo u qorsheysan wasaaradda waxaa kamid ah:

- In lasameyo makamadaha guur guura (mobile courts);
- In ladayctriro xabsiyada, maxkamadaha ilaa heer degmo;
- In la qabto tababaro iyo aqoon isweeydaarsiyo shaqaalaha wasaaradda.

IV. Wasaaradda Caafimaadka

Wasaaradda Caafimaadka ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya howlahii aay qabatey mudadii ay dhisneyd waxaa ka xusi karnaa:

- Waxey dejisay nidaamka caafimaadka aas-aasiga ah;
- Waxay dhistey Maamulka Caafimaadka heer gobol iyo heer degmo;
- Dhismaha Isbitaalka Dhimirka ee Baydhabo oo ay fuliyeen Hay'addaha SSF iyo DDG;
- Dayactir iyo qalabeyn lagu sameeyey isbitaalka Degmada Afgooye;
- Waxay wadadalo la gashey Hay'adda World Vision, waxayna isla meel dhigeen qaabkii wax looga qaban lahaa caafimaadka Guud ee KGS, iyadoo durbaba hergalisey 4 MCH;
- Waxay daawooyin kala wareegtey Dowlada Sacuudi Carabiya oo loo qaybiyey Xarumaha Caafimaadka degmooyinka Marko, Wanlaweyn, Qansaxdheere, Berdaale, iyo Tiyeeglow;
- Waxey qabatay Olole Ku saabsan wacyi-galin caafimaad oo bulshada looga digayey khatarta Cudurka Shuban biyoodka oo laga sameeyey Baydhabo isla markaana waxaa dhoor ceel Biyood ah lagu shubay maadada "Chlorine" ee disha jeermiska IL ma aragtada ah ee keena xanuunada;
- Waxay qaybka noqotey Ururka Caafimaadka Bariga Afrika Ee "Somal"
- Waxay ka qayb gashey Shirar kala Gedisan Sidashirarka caafimaadka ee "EMRO" iyo weliba waxay xariir dhow la leedahay Wasaaradda Caafimaadka Soomaaliya iyo Deeq bixiyaasha caalamiga;
- Iney ku matasho Dowladda KGS shirarka looga hadlayo Arrimaha Caafimaadka dalka Soomaaliya.

Wasaaradu waxay leedahay qorshe heer Dowlad Goboleed oo weli qabyo ah. Howlahii aay Wasaaradda qabatay sanadkan waxey ku qornaayeen qorshe sanadeedka wasaaradda.

Wasaaraddu waxay leedahay Xafiis qalabeysan iyo 42 shaqaale rayid oo mutadawaciiin ah oo heer Gobol iyo heer Degmo ka kooban.

Mudada Saddexda sano soo socoto wasaaradda waxyaalaha ugu muhiimsan oo ay qorsheyneyso waxaa kamid ah:

- ✓ In lahelgo goobo adeeg caafimaad ilaa heer tuulo;
- ✓ Saro loo qaado heerka nafaqada dhallaanka deegaanka hoos taga KGS;
- ✓ Saro loo qaado talaalada hoooyada uurka leh iyo caruurta kayar 5 sanno;
- ✓ Dayactir goobaha adeega caafimaad;
- ✓ Saro uqaadis aqoonta shaqaalaha caafimaadka.

V. Wasaaradda Kaluumeysiga iyo Kheyraadka Badda.

Wasaaradda Kaluumeysiga Iyo Kheyraadka Badda Ee Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya waxay bahwadaag yihiin mida Dowlada Dhexe, waxay qabatey mudadii ay jirtey qodobada hoose ku qoran: -

- Waxa la habeeyey sharciga Kaluumeysiga iyo Hay-kalka Wasaaradda;
- Waxay tababar Shaqaale ka tirsan Wasaaradda ugu dirtay dalka Jabuuti, kuwaas oo qatey Tababaro la xariira caluumta badda, waxaana la siiyey shahaadooyin;
- Waxay shirar kala gedisan kaga qayb gashey Dalalka China, Jabuuti iyo Jaziirada Sychelles;
- Iney ku matasho Dowladda KGS shirarka looga hadlayo Arrimaha Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda Soomaaliya;
- Dib u habeynta sharciga kaluumeysiga.

Wasaaraddu waxay leedahay qorshe howleed heer Dowlad Goboleed. Sidoo kale waxyaabaha ay qabaneysay wasaaraddu oo idil waxey waafaqsanaayen qorshe sanadeedka wasaaradda.

Wasaaraddu waxay leedahay hal qol oo xafiis iyo 13 shaqaale oo mutadawiciin ah.

Qorshaha saddexda sano ee soo socda waxaa ugu muhiimsan:

- In 950 qof oo dhalanyaro ah tababar kaluumeysiga loo sameeyo dhowr meelood (Jasiira, Marka iyo Barawe) iyadoo ka dibna shaqo abuur loogu sameeyo iney ka kaluumeystaan badda KGS oo dhiirarkeedu yahay 350KM;
- In la dayactiro suuqyada lagu kala iibsado kalluunka;
- In ladiyaaariyo qaboojiyaal lagu keediyo kalluunka;
- In sare loo qaado tayada qalabka ay isticmaalaan kaluumeystada KGS.